



BARNAAMIJKA WAXBARASHADA

QABYO-QORAAL WEEYI [1st Draft]

**BARNAAMIJKA
WAXBARASHADA
URURKA
LAASDHUURE**

TUSMADA

1. GOGOLDHIG

2. WAXBARASHADA

➤ NOOCYADA WAXBARASHADA

3. SHIRKA WAXBARASHADA

4. QORSHAHA WAXBARASHADA TOOSKA

➤ FURSADAH & DEEQAH WAXBARASHO

➤ HABKA DIWAANGELINTA ARDEYDA


➤ HABKA KALA-XULIDDA ARDEYDA

➤ LA-SOCODKA WAXBARASHADA ARDEYDA

5. QORSHAHA WAXBARASHADA DADBAN

6. KABKA & ILLAHA DHAQAALE

7. GABOGABO



1. GOGOL-DHIG


Ururka Laasduuure waxa uu qabtay doorasho qof iyo cod ah, taasi oo xubnaha ururka lagu weydiiyay yoolka ururka, iyo barta ururku baylahda reer Maxamuud Yoonis kaga beegmayo.

Doorashadaasi oo dhacday taariikhdu markii ay ahayd 29-03-2024, waxa natijadii noqotay in xubnaha ururka badankoodu doorbideen Waxbarashada, in dhanka waxbarashada laga taageero dhallinyarada reer Maxamuud Yoonis.

Maxaad ku talin lahayd ino
noqdo wax qabadka koowaad ?


 Copy

80 responses



2. **WAXBARASHADA**

- Waxbarashadu waa aasaaska nolosha qofka, waana mid qofka u horseedda in habsami-u-socodkii noloshiisu ay hayaagto.
- Qofka waxbartay waxa uu dalka u yahay hiil iyo hogaan aan laga maarmayn, oo waxaa uu bartay ay bulshadiisii marti uga tahay.
- Kolkaa in dhamaan dadka wax la baraa waxay ka dhigan tahay, in la hayaajiyay guud ahaan habsami-u-socodka noloshii bulshada dalka.
- Waxaynu ognahay maanta in ay waxbarashadu noqotay habka kaliya ee qofkii uu bulshada ku dhix gali karo, kuna dabbari karo noloshiisa iyo ta qoyskiisaba.
- Sidaasi oo ay tahay; waxa la yidhi hadii qof baahan aad wax siiso, maalin ama dhowr cisho ayaad noloshiisa taageertay, hadii se aad waxbarto, waxaad taageertay qofkaa guud ahaan noloshiisa oo idil.



2.1 Noocyada Waxbarashada

Waxbarashadu way noocyo badan tahay, aqoonta laga qaataana way kala du-duwan tahay, waxbarashadu si guud waxay u kala baxdaa laba nooc:

- 1.** Waxbarasho nidaamsan, oo muddo dheer la wado, una habeysan heerar kala dambeeya, sida:
 - Dugsiga Hoose
 - Dugsiga Dhexe
 - Dugsiga Sare
 - Jaamacad
- 2.** Waxbarasho gaaban oo heer kaliya lagu dhameysto, oo ay ka mid yihiin noocyada kala duwan ee Farsamooyinka Gacanta.

School



College



University



Primary and secondary	Undergraduate	Undergraduate/Graduate
No Degrees Offered	Bachelors Degree	Graduate Degree
Small in Size	Medium Size	Large in Size
Offer General Education	Specific area of study	Range of subjects or research

3. SHIRKA WAXBARASHADA

- Waxbarashadu way noocyo badan tahay, isla markaana way kala qiimo badan tahay, kolkaa in ururka Laasduure uu yool ka dhigtay waxay u baahatay qorshe balaadhan, oo ku dhisan deraasad cilmi ah iyo in si hubsiimo leh loo guda-galo.
- Markaa ka-guddi fulin ahaan; waxaanu qorsheynay in aanu qabano SHIR-WAXBARASHO, oo aanu ku soo casuumno dadka ku dhex jira ee ehelka u ah arrimaha waxbarashada, si aanu ugala tashano, oo ay noola qiimeeyaan barnaamijkan ama siyaasadan aanu u dejinay inaanu kaga hawlgalno waxbarashada, isla markaana aanu uga helno wixii kordhin, kaabis iyo wax-ka-badal ah ba.
- Shirkaa waxbarashadu waxa uu qabsoomey __/__/__ waxaana uu ku qabsoomay goobta/xafiiska __
- Shirkaasi waxaa ka soo qaybgalay aqoonyahanka reerka, ee takhasuskoodu yahay macalinnimo iyo inta shaqadoodu tahay mid la xidhiidha arrimaha waxbarashada, waxaana ka mid ah xubnaha ka soo qayb galay shirka:
 - ...



4. QORSHAHAD WAXBARASHADA Tooska Ah

Si ardeydeenii wiilal iyo habloba ay uga qayb qaataan barnaamijkan waxbarasho ee Urrurka Laasduure, waxaynu u diyaarinay nidaamkan:

- 1.** Waa in guddida fulinta iyo guddi-hoosaadka waxbarashadu, ay diyaariyaan liiska fursadaha waxbarasho ee diyaarka u ah,
 - Tirada ardeyda ay Jaamacadda ka bixin karaan
 - Tirada ardeyda ay dugsiyada Farsamada Gacanta ka bixin karaan
 - Tirada deeqaha waxbarasho ey hayaan & noocyadooda.
- 2.** Waa in la diiwaangeliyo ardeydi kadibna liiskooda la soo bandhigo.
- 3.** Waa in fursadihi waxbarasho loo qaybiyo ardeyda la diiwaangeliyay.
- 4.** Waa in ardeydi ku guuleysatay fursadahii waxbarasho, ay guddida fulinta iyo guddi-hoosaadka waxbarashada, si joogto ah ay uga warhayaan habsami-u-socodka waxbarashadooda, ilaa inta ay ka dhameynayaan.



- 5.** Waa in guddida fulinta iyo guddi-hoosaadka waxbarashadu, ay qaban-qaabiyaan xaflad loo qabto marka ay ardeydaasi dhameystaan waxbarashadaasi, isla markaa na guddidu ay xafladaasi ku soo bandhigaan warbixin ku saabsaan sooyaalkii waxbarasho ee ardeydaasi, iyo heerarkii ay soo martay hawshoodu.
- 6.** Waa in warbixintaasi iyo xogtii xafladdaba loo gudbiyo xog-hayaha ururka si loo keydiyo.



4.1 Fursadaha iyo Deeqaha Waxbarasho

- 1.** Guddoomiyaha guddida fulintu, sanad-dugsiyeed kasta waa inuu magacaabo guddi uu ku jiro, oo soo hesha deeqaha waxbarasho ee ay bixiyaan Jaamacadaha, macaahidda, dugsiyada farsamooyinka gacanta, iyo dhamaan wixii deeq wax lagu baranayo gudaha dalka iyo dibada ba laga heli karo.
- 2.** Marka ay soo gudbiyaan kooxda dhaqaalaha ee Khasnajigu hogaaminayaa miisaaniyadii sanadka, waa in guddoomiyaha fulinta iyo guddi-hoosaadka waxbarashadu ay qiimeeyaan, dhaqaalahaa soo xerooday inta ardey ee Jaamacad lagaga bixin karo, iyo inta ardey ee farsamo-gacmeed lagu bari karo.
- 3.** Waa in guddoomiyuhu soo bandhigo warbixin ay ku dhan yihiin, dhamaan deeqihii waxbarasho ee la soo helay, iyo inta ardey ee dhaqaalaha ururku hayo lagaga bixin karo Jaamacadda iyo Farsamooyinka Gacanta ba.
- 4.** Warbixintaasi waa in la soo geliyo website-ka ururka, isla markaana lala wadaago xubnaha ururka Laasdhure.

**SCHOLARSHIP
OPPORTUNITIES**



4.2 Habka Diiwaangelinta Ardeyda

- 1.** Xubnaha guddi-hoosaadka deegaannada, ayaa soo qoraya ama soo ogaanaya amaba lagu soo hagaajinayaa ardeyda, kadibna xogta ardeyda ay hayaan waxay u soo gudbinayaan guddoomiyahooda, shuruudda ardeynimaduna waa:
 - Waa inuu yahay/tahay reer Maxamuud Yoonin,
 - Waa in aanu/aanay ka waynaan 25-sanno,
 - Waa in aanu waalidka ama mas'uulka ardeygu lahayn awood uu kaga bixiyo waxbarashada,
 - Waa in ardeygaasi degan yahay ama joogo wadanka gudihiisa,
 - Waa in ardeygu isagu uu rabo waxbarashada, oo aan lagu khasbeynin,
- 2.** Ardeyda la diiwaangelinayaan wiilal iyo hablo ba way noqonayaan, waxaana ka mid ah:
 - Qof hore wax u soo bartay, oo inta ka dhiman u baahan in laga caawiyo,
 - Qof aan hore waxba u soo baranin ama aan waxbarashada nidaamiga ah hore u soo marin,
- 3.** Guddoomiyaha guddi-hoosaadka deegaannadu, waa inuu ardeydaasi xogtooda soo geliya form-ka diiwaangelinta ardeyga ee Website-ka Laasdhure, ama waa inuu Xidhiidhiyaha guddida fulinta u soo gudbiyo xogta ardeyda.



4. Foomka lagu diiwaangelinayo ardeyga, oo ku jira website-ka ururka leeyahay, waxaa ku dhameystiran dhamaan wixii looga baahnaa in ardeyga xog ahaan looga keydiyo.

5. Marka la gaadho xilligii ardeyda loo qaybinayay fursadaha diyaarka ah, waa in xoghayuhu soo saaro liiska ardeyda diiwaangashan.



DIIWAANGELINTA ARDEYDA

Faahfaahinta Ardeyga

Magaca Ardeyga...

Magaca Aabihii...

Magaca Awawgii...

Taariikhda Diiwaangalinta 07/23/2024

Taariikhda Dhalashada 07/23/2024

Jinsiga Ardeyga

Deegaanka ardeygu joogo?

Aqoontu Doortay

Lambar lagala xidhiidho...

Faallo ku saabsan ardeyga noloshiisa...

ka

DIIWAANGELI ARDEYGANI

4.3 Habka Ardeyda Loogu Qaybinayo Fursadaha

Marka liiskii ardeyda la diiwaangeliyay uu soo baxo, kala saaridooda iyo kala xuliddoodu waxay noqonaysaa sidan:

- 1.** Guddoomiyaha ururku waa inuu magacaabo guddi isku dhaf ah oo ka kooban; guddi-hoosaadka waxbarashada, xubin guddida anshaxa iyo la-xisaabtanka ah iyo xubno kale oo xog-ogaal u ah reerka oo uu ku xoojiyo, si ay ardeydan la diiwaangeliyay u qiimeeyaan si guud, in ay yihiiin kuwii ku haboonaa fursadahaan waxbarasho in ay ka faa'iideystaan iyo inkale, iyaga oo ka eegaya duruufta iyo waayaha uu ardeygu la nool yahay, waana in ay indhahooda ku soo arkaan xaalada dhabta ah ee ardeyga ama mas'uulkiisa wareystaan.
- 2.** Waa in guddi-hoosaadka waxbarashadu, inta ka soo gudubta qiimeynta 1^{aad}, intooda waxbarasho hore u soo maray, ay qiimeeyaan heerka ay aqoontoodu joogto:
 - Waa in ay helaan xogta waxbarashadii ardeygaasi, hadii ay noqoto imtixaannadii uu galay iyo darajadii uu helay.
 - Waa in ay ka qaadaan imtixaanno fudud oo ay ku ogaanayaan heerka aqoontiisu joogto.
- 3.** Waa in guddi-hoosaadka waxbarashadu, inta ka soo gudubta qiimeynta 2^{aad}, ay u bandhigaan fursadaha waxbarasho ee diyaarka ah, kadibna ardey kasta weydiyaan ta uu rabo inuu galo.



4. Waa in guddi-hoosaadka waxbarashadu, ay fursadaha waxbarasho ee diyaarka ah, mid kasta u diyaariyaan imtixaan, si fursad kasta inta ardey ee doorataa, ay ugu kala baxaan imtixaankaasi.

- Ardeyda ku tartamaysa fursadda in Jaamacadda laga bixiyaa, waa in ay dugsigii sare ku soo gudbeen darajada "A"
- Ardeyda ku tartamaysa fursadda Deeq-Jaamacadeed, waa in ay dugsigii sare ku soo gudbeen darajooyinka "B, C"

5. Waa in guddi-hoosaadka waxbarashadu u soo gudbiyaan inta guuleysatay guddida fulinta, kadibna guddoomiyaha guddida fulintu uu ardey kasta oo guuleystay siiyo ogolaanshihi, uu waxbarashada ku galayay.

6. Waa in guddi-hoosaadka waxbarashadu ay u qaybiyaan fursadaha iyo deeqaha waxbarasho ee farsamooyinka gacanta ardeydan:

- Ardeyga dugsigii sare ku soo gudbay darajada "D"
- Ardeyga dugsigii sare helay darajada "E"
- Ardeyga aan hore waxba u soo baranin,
- Ardeyga aan hore u soo marin waxbarasho nidaamsan,



7. Si waxbarashada farsamooyinka gacanta loogu qaybiyo ardeydaasi, waa in la qaado talaabooyinkani:

- Waa in ardey kasta loo soo bandhigo inta fursadood ee diyaarka ah, iyo mid kasta faa'iidada ay leedahay.
- Waa in ardey kasta uu doorto midda uu rabo.
- Waa in guddi-hoosaadka waxbarashadu ay kala taliyaan ardeyga ta ku haboon ee ay tahay inuu doorto.
- Waa in guddi-hoosaadka waxbarashadu ay ku kla saaraan imtixaan fudud, fursad kasta inta ardey ee dooratay.
- Hadii ardeyda tartamaysaa ay u badan yihin kuwo aan hore waxba u soo baranin, waa in loo qori-tuuro ardeyda si cadaalad ah, kadibna inta nasiib u hesha fursadahaasi waxbarasho laga dhix sheego isla goobta qori-tuurka.

8. Waa in guddi-hoosaadka waxbarashadu ay xogtii hawsha kala xulidda u soo gudbiyaan guddoomiyaha ururka.


9. Gudoomiyaha ururku intaanu warbixinta ardeyda ku soo bandhigin warbaahinta ururka, waa inuu guddida anshaxa iyo la xisaabtanka u diro nuql rasmi ah oo dhameystiran, ugu badnaan 1-todobaad waa inuu sugo jawaabta guddida anshaxa, si hadii qalad sharci jiro loo saxo, kadibna waa inuu ku soo bandhigo warbixintaasi dhamaan warbaahinta ururku adeegsado, xoghayuhuna ku daro keydka ururka.

4.4 Qorshaha La-Socodka Waxbarashada Ardeyda

Waxaynu la soconnaa; in barnaamijka waxbarashada ee ururka Laasdhure uu yahay barnaamij khayri ah, looguna talogalay in ay ka faa'iidaystaan dhalinyarta reer Maxamuud Yoonis, ee aan fursad waxbarasho oo haboon iyo dhaqaale ay ku bixiyaan ba helin, sidaa awgeed; guddi-hoosaadka waxbarashada ee ururku waxay xoogga saarayaan, la-socodka hayaanka waxbarasho ee ardeyda ka faa'iidaysanaya barnaamijka.

Hadaba, ujeedada guud ee laga leeyahay shaqadan la-socodka ardeyga ayaa ah, in la hubiyo dhamaan ardeyda la soo xulay in ay uga faa'iidaysteen sidii loo baahnaa iyo in kale, sidoo kalena, ay guushooda iyo si-wacan-wax-u-baradkoodu dhiirigalin u siiso dhamaan xubnaha ururka Laasdhure, kuwaasoo caqligoodii iyo cududdoodiiba iskugu geeyey sidii ay dadkooda u gacan qaban lahaayeen.

Qorshaha la-socodka ardeyda fursadda u heshay barnaamijkan inay ka faa'iideystaan, waxa uu noqonayaa sida soo socota:



La-Socodka Ardeyda

Waxbarashada Tooska Ah

1. Waa in arday kasta usoo gudbiyo report-ka imtixaan kasta guddi-hoosaadka waxbarashada.
2. Arday kastoo ka faa'iidaysanaya, waa in GPA aanu ka hoosayn '**3**'
3. Waa in aanay jirin ardeyga wax maadooyin ah, oo ka maqan report-ka imtixaankiisa.
4. Waa in aanu ka maqnaanin waxbarashada, muddo ka badan celcelis ahaan **2-Todobaad**
5. Waa in ardeygu la socodsiiyo guddi-hoosaadka waxbarashada, maqnaanshiiyihiiisa wixii ka badan **2-Todobaad**.




La-Socodka Ardeyda

Farsamada Gacanta

1. Guddi-hoosaadka waxbarashadu waxay ardeyga kala talin donaan xirfada uu qaadanayo, iyaga oo u eegaya fursadaha shaqo ee suuqa ka banaan.
2. Xirfadda uu qaato ma badali karo ardaygu isaga oo aan la socodsiiin guddi-hoosaadda waxbarashada.
3. Waa in arday kasta u soo gudbiyo report-ka imtixaan kasta guddi-hoosaadda waxbarashada.
4. Arday kasta oo kamid ah ka-faa'idaystayaasha, waa in aanu ka hoosayn imtixaankiisu 70%.
5. Waa in aanay jirin maadooyin ka maqan report-ka imtixaankiisa.
6. Waa in aanu ka maqnaanin waxbarashada celcelis ahaan muddo ka badan **1-Todobaad**
7. Waa in ardeygu la socodsiiyo maqnaanshiiyihiiisa wixii kabaden **1-Todobaad**

- ✓ Guddi-hoosaadda waxbarashada, ardey kasta oo ka soo bixi waaya shuruudaha ku xusan qaybta la-socodka waxbarashada ardeyda, waxay ka qaadi doonaan talaabooyinkan:
 - a. Marka hore, way la kulmayaan ardeyga, digniin afka ah na way siinayaan.
 - b. Marka labaad, digniin qoraal ah ayay siinayaan ardeyga, waalidkiisana way la kulmayaan.
 - c. Marka sadexaad, kal-waxbarasho ayaa laga joojinayaa.
 - d. Ugu danbayn, waxaa gebi ahaanba laga joojinayaa dhaqaalihii laga bixin jiray.
- ✓ Guddi-hoosaadda waxbarashadu waxay diyaarin doonaan bar-kulan u gaara ardeyda iyo iyaga, si ay halkaa uga wada socdaan, oo ugu kala xog qaataan, isla markaana ardeyda ku siiyan wacyigalin joogto ah.
- ✓ Guddi-hoosaadda waxbarashada sidaa oo kale, waxay si joogto ah uga sii deyn doonaan warbaahinta ururka Barnaamijka Wacyigelinta Waxbarashada, kaasi oo ay ku soo bandhigi doonaan dhamaan arrimaha waxbarashada ee ay u xilsaaran yihiin, iyo wareysiyo kooban oo ay ardeyda ka soo qaadaan, si ay ula wadaagaan xubnaha ururka.



5. QORSHAHADDA WAXBARASHADA DADBAN

- 1.** Sida aynu wada ognahay; ardeyda uu ururka Laasdhure xaga waxbarashada ka taageerayaa, waa carruurteenii oo waalidkii dhalay ay awoodi waayeen in ay ka bixiyaan waxbarashada.
- 2.** Kolkaa si aynu u yareyno culeyska ka imanaya tirada ardeyda u baahan in laga taageero waxbarashada, waa in waalidiinta aan lahayn aqoon ay kaga xoogsadaan suuqa la siiyo aqoon iyo farsamooyin ay ku dabari karaan nolol maalmeedkooda.
- 3.** Guddida fulinta ururka laasdhure waxaa u qorsheysan, in ay diyaariyaan goob waxbarasho oo ku taala caasimada Hargeysa, taasi oo ay ku dhameystiran yihiin dhamaan agabkii wax lagu baranayay.




- 4.** Goobtaasi waxbarasho oo loo diyaariyay in aynu waalidiinta caruurteena wax ku barno, gaar ahaan farsamooyinka gacanta ee suuqa lagaga shaqeysan karo.
- 5.** Shuruudda qofka goobtani wax ka baranayaana waa:
- In uu yahay waalid dhalay caruur reer maxamuud yoonis ama uu mas'uul ka yahay caruur reer maxamuud yoonis ah.
 - In uu yahay mid aan awood u lahayn inuu iska bixiyo waxbarashada.
 - In uu caafimaad qabo maskax ahaan iyo jidh ahaanba.



6. KABKA & ILLAHA DHAQQAALE

1. Dhaqaalaha rasmiga ah ee Ururka Laasdhure, uu kaga hawlgalayo waxbarashadu, waa qaadhaanka ay xubnaha ururku iska soo ururiyaan, iyo wixii kab ah ee ururku ka helo guud ahaan reer Maxamuud Yoonis intooda wax haysata, hadii ay yihiin tijaarta, aqoonyahanka, ganacsatada iyo beeralayda ba.



2. Hadaba ururku si uu u gaadho tiro badan oo ardaydeenii ah, waxa guiddida fulinta u qorsheysan in ay maalgeliyaan xarumo waxsoosaar, oo noqda il kale oo dhaqaalaha ururka kab u noqota.

- Dhul-beereedyada reer maxamuud yoonis, in ururku ka helo bogcad ay ku beertaan midhaha mudada kooban ku soo go'a (Cash Crop), taasi oo faa'iidada ka soo baxdana loo qaybsanayo %70 ururku leeyahay iyo %30 qofkii dhulka lahaa uu qaadanayo.
- Waalidiintii ka faa'iideystay barnaamijka waxbarashada dadban ee ururka Laasdhure, oo loo diyaariyo goobo ganacsi ooy kaga hawlgalaan aqoontii iyo farsamooyinkii ay barteen, taasi oo faa'iidadana loo qaybsanayo %20 ururku leeyahay iyo %80 waalidkaasi qaato, sida;
 - Geerash baabuurta lagu hagaajiyo, hadii ay noqoto baabuurta reer maxamuud iyo kuwo kale ee dalka.
 - Iskaashatada farsamo-yaqaannada reerka, oo ka kooban dhamaan noocyada kala duwan ee suuqa lagaga shaqeysto, kuwaasi oo dalab iyo hab casri ah ka shaqeysan doona reerka iyo guud ahaan dalkaba.
 - Iwm...



7. GUNAANAD



**Qalinkaa Wax Suureeya
Kugu Sima Halkaad Doonto
Saaxiib Kal Furan Weeyi
Weligaa Ha Sii Deynin**



**Waa Carruurtiiniye
Waxbarashada Geeya
Oo Qayrkood Yay Ka
Hadhin**



**Lacagta Aad Bixinayso
Waxa Wax Ku Baranayaa
Waa Dhalinyaradii Reer
Maxamuud Yoonis**